Amarka L. 21 rep

Dhisidda adeegga Kormeeridda Shaqada.

MAAMULKA WASAAYADDA SOOMAALIYA EE TALYAANIGA

MAAMULUHU

Marka uu arkay xeerka 8 Febbraayo 1950, lamba. 12;

Marka uu arkay dekeretada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaaniga 31 Maarso 1950;

Marka uu garowsaday baahida loo qabo in la dhiso hay'ado gaara oo ilaaliya dabbaqaadda xeeraka la xariira xaaladaha shaqada iyo ka-hortagga bulshada, iyo sidoo kale in ay tilmaamaan iyo isku duwaan hawlaha kor loogu qaadayo horumarka bulshada, si waafaqsan mabaadiida uu soo saaray Heshiiska Maamulka Wasaayadda;

Marka uu dhageystay talada Guddiga La-talinta Qaramada Midoobay;

Marka uu dhageystay talada Golaha Dalka.

WUXUU AMRAYAA

Qod. 1

Waxaa laga dhisay Soomaaliya adeegga Kormeeridda Shaqada.

Qod. 2

Xilka Kormeeridda shaqada waa kuwa oo socda:

a) in ay hagaan iyo iskuduwaan hawgallada hay'adaha shaqada iyo ururada ka hawlgala xagga bulshada ee shaqada;

b) in ay hubiyaan dabbaqidda dhammaan xeerarka la xariira xaaladaha shaqada iyo ilaalinta bulshada agaasinbka, warshadaha, ganacsiga, beeraha, iyo weliba meelkasta oo ay ka socoto shaqo lacag lagu qaato, marka laga soo tago waxyaabaha xeerarku sida gaarka u.reebayo;

c) in uu uruuriyo macluumaadka ku saabsan xaaladaha si ay shaqadu u socoto, ay ku bixiyaan akhbaaraadka iyo talooyinka farsamo qaab wax ku oola si loo ilaaliyo xeerarka maaddadaas ka jira;

d) Ilaaliyaan fulinta heshiisyada shaqada, in loo hoggansamay heshiisyada shaqada, iyo sidoo kale iyo xeerarka ku saabsan dhowrista shaqaalaha, ee la xariirta habsami u socodka hawlgallada ilaalinta, kaalmaynta iyo faya dhowrka- caafimaadka oo loo fidiyo kuwa haya hawlaha wakaaladaha dawladda ama kuwa gaar loo leeyahay, in ay u hoogaansameen xeerarka wax nidaamiya ee la xariira caymiska iyo shilalka ;

e) Ay qaadaan talaabooyinka lagu suulinayo cilladaha ka yimaada qalabka rakibadda ama qaabaka shaqada kuwaaso halis ku noqon kara cafimaadka iyo badqbka shaqaalaha, iyagoo u soo gudbinaya madaxda u xilsaaran iyo ay weydiistaan in ay ka soo saaraan amarro ama tallaabba fulin deg-degga wadata.

Qod. 3

Xilka Kormeeridda shaqada waxaa u xilsaaran Xaafiiska Warshadaha, Ganacsiga Gudaha ee Shaqada, kaaso Madaxa Xaafiisku uu qabanayo xilalka Koormeeraha Dhexe ee Shaqada. Isagu wuxuu xilkaas u wakiilan karaa Madaxa Qaybta Shaqada iyo Kaalmada Bulshada.

Qod. 4

Guddoomiye kasta ee Gobol xilalka Kormeeraha Shaqada waaxaa u xilsaaran Guddoomiyaha Gobolka, kaasoo hadba mar u wakiilan kara xilalkaas dad ka tirsan Maamulkaas haddii ay jirto baahi la xaqiijiyay.

Kormeerayaasha Shaqada marka xilalkooda gudanayaan waxay dalban karaan khubaro hawlahaas ka caawiya, farsamayaqaanno ku habboon, si loo hubiyo dabbaqaadda xeerarka la xariira fayadhowrka iyo badqabka shaqaalaha.

Qod. 5

Kormeerayaasha shaqada waa in ilbaadinta ku sameeyaan waqtiyo isku dhow xaaladaha shaqo ee ka jira deegaankooda.

Iyagu waxay u fasaxanyihiin in adeegsadaan, marka ay xilkooda gudanayaan, awoodaha soo socda;

a) si xora in ay booqdaan, qayb kasta oo ka mida, saacad kasta ee maalinta iyo xitaa habeenka, dhismayaasha, shaqaalaha, goobaha dhismahu ka socdo, iyo shaqooyinkaa ilaalintooda hoos imaanaya, ay ku siiyaan akhbaarta iyo talooyin farsamo qaaabab ku habboon si loogu hoggaansamo xeerka maaddadaas;

b) in ay qaadan imtixaan kasta, xakamayn ama baaris garsoor oo loo baahanyahay si loo hubiyo in xeerarka sharciga si habboon iyo sidoodii loogu hoggaasamay:

1) wareystaan keligiis ama iygaoo makhaatiyo ay joogaan, loo-shaqeeyaha shaqada ama hawlwadeenada agaasinka arrimaha la xariira dabbaqaadda xeerarka sharciga, ama ay weydiiyaan macluumaad cidkasta oo markhaati furkiisa loo arko in loo baahanyahay;

2) ay weydiistaan indho-indhaynta buug kasta ama dokumenti in uu haysto uu dhigayo shuruucda la xariirta xaaladaha shaqada, marka la hubinayo waafaqsanaanta xeeraka sharciga, in nuqul/koobi laga sameeyo ama wax laga soo saaro;

3) la dalbado in lagu soo dhajiyo ogaysiisyo mararka ay sheegayaan xeerarka sharciga;

4) la qaado samballo si loo falanqeeyo maaddada ama walxa la adeegsaday ama gacmaha laga qabtay, iyadoo la wargelinayo loo-shaqeeyaha shaqada ama wakiilkiisa..

Marka la sameynayo booqashada indho-indhaynta, Kormeeraha Shaqada waa in uu wargeliyaa joogitaankiisa loo-shqeeyaha ama wakiilkiisa, haddii aanu u arkin in ogaysiiskaasu uu wax u dhibi karo baarista ku habboon.

Qod. 6

Kormeerayaasha shaqada:

a) kama lahaan karaan wax dana nooc kasta ha ahaadeene, kuwaa toosa ama kua aan toos ahayn agaasinka ay baarayaan;

b) waxa lagu qaadayaa ciqaabta ku xusan qod. 623 Xeerka ciqaabta, mana sheegii karaan sirta warshadaha ama ganacsiga ama habraacyada deefsiga ay ku ogaadeen marka ay xilkas gudanayeen;

c) waa inay ula dhaqmaan in ay yihiin gebi ahaan kuwa qarsoodi ah, ilaha ashtaka kasta oo ay ka muqato cillad xagga rakibaadda qalabka ama jebinta xeerarka sharciga in ay yihiin gebi ahaan kuwa qarsoodi ah, waa in ay ku ekaadaan in ay u sheegaan loo-shaqeeyaha ama wakiilkiisa in uu dhacay booqashada indh-indhaynta, markii ashtako laga keenay;

d) waa in ay u soo sheegaan Kormeeraha Dhexe dhammaan xaaladaha dabbaqaadda xeerarka shaqada ay ka muuqato in ay khilaafsanyihiin mabadiida Heshiisyada iyo Talooyinka caalamiga.

Qod. 7

Koormeerayaasha Shaqada iyo kuwa loo wakiishay si waafaqsan qodobada la soo sheegay, inta ku siman xudduudka loo xilsaaray iyo marka la eego awoodda la siiyay, waxay yihiin saraakiil boliiska garsoorka.

Qod. 8

Waxaa ku waajiba Kormeerayaasha Shaqada in ay u diraan Kormeeraha Dhexe warbixin sanadle ah ee ku saabsan hawlaha ay qabten, dhammaan sidoo akhbaarta iyo macluumaadka ee la xiriira qaybtooda shaqo.

Qod. 9

Kuwa shaqooyinka qabta iyo wakiiladooda waxaa loo ballan qaadayaa in ay si xora ula xariraan Kormeerayaasha Shaqada.

Qod. 10

Waxaa ku waajiba hay'adaha wax caymiya in ay soo wargaliyaan Kormeeraha Shaqada ku leh dhammaan xaaladaha shilalka ka dhacay iyo cudurada xirfadda.

Qod. 11

Koormeeraaasha Shaqada waxay xaq u leeyihiin in ay ka sameeyaan maxdar/dood-qoraaleedu wixii ku saabsan jebinta xeerarka jira eeshaqada, oo loo soo gudbinayo Kormeeraha Dhexe oo ay ku xigaan Hay'adah garsoorka.

Inta aan la geyn maxdarka jabinta sharciga Kormeerayaasha Shaqada, marka ay qiimeeyaan duruufaha xaaladaha, waxay iqtiyaar u leeyihiin in ay diidaan iyago loo shaqeeyaha siinaya tilmaamo gaara, una qabanaya muddo uu wax ku hagaajiyo.

Qod. 12

Jabin kasta ee xeeraka Amarkaan ku qoran waxaa lagu ganaxayaa So. 500, haddii dhacdadu aanay keenayn dambi ka culus.

Maxdarka la socda waa in loo soo gudbiyaa Kormeeraha Dhexe si uuugu gudbiya Hay'adaha garsoorka.

Muqdisho, 23 Nofember 1951.

Maamulaha

Forlani